



## Nabigaan waydiiyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray

Cabdillaahi Binu Maseud -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabigaan waydiiyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray", waxaan iri: arinkaasi waa mid wayn, maxaa ku xiga?, wuxuu yiri: "inaad ilmahaaga disho, adoo ka cabsanaaya inuu wax kula cuno", waxaan iri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "inaad ka sinaysatid xaaska dariskaaga".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee, waxaa la waydiiyey dambiyada ugu waa wayn wuxuuna yiri: Dambiyada shirkiga wayn ayaa ugu wayn, waana inaad Ilaahay u samayso mid u dhigma ama la mida Ilaahnimadiisa ama Rabinimadiisa ama Magacyadiisa iyo Sifaadkiisa, danbigaasna Ilaahay kuma dhaafno towbad mooyee, qofkii sameeyaa haduu ku dhinto naarta ayuu ku waarayaa. Ka dib waa qofka oo ilmihiiisa dila isagoo ka baqaya inuu wax la cuno, dilka naftuna waa la xarimay, laakiin wuxuu dambigu ku sii waynaanayaa markuu noqdo kan la dilay mid qaraabo dhaw la ah kan dilay, waxa kaloo dambiga sii waynaynaya marka ujeedka dilku noqdo cabsi uu ka qabo kan wax dilay in kan la dilay la wadaago irsaaqada Ilaahay. Ka dib waxaa xiga inuu ninku ka sinaysto xaaska ninka dariskiisa ah, isagoo xodxodonaaya si ay u ogolaato oo uu uga sinaysto. sinadu waa xaaraan laakiin wuxuu dambigeedu sii wayn yahay marka mida laga sinaystey ay tahay xaaska dariska ee shareecada islaamku kula dardaarantay in la wanaajiyo oo loo baarinimo falo oo dhaqan fiican lagula dhaqmo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5359>

